



Falanqeynta Xulashooyinka Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta E

PPS Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari (Southeast)
ee Jiilaalka 2022
Janaayo 19, 2022

Xulashooyinka Habeynta Barnaamijka

Janaayo 13, 2022, Isbahaysiga Hagida Koonfur-Bari waxay siiyeen Degmada iyo FLO Analytics xulashooyinka la cusboonaysiiyay ee ay ku sahamiyaan meelaynta Barnaamijyada Laba Luuqad Wax-ku-barashada (DLI) iyo hubinta in Harrison Park iyo dugsiyada dhexe ee Lane la diwaangeliyo si ay u gaadhaan yoolka diwaangelinta 2025-26 ee 500 oo arday ah.

Xulashooyinka Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta E waxay ku dhisan yihiin fikradaha soo socda ee meelaynta barnaamijka ee muhiimka ah. **Calaamadintu** waxa ay tilmaamaysaa isbeddelka taxanaha Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D.

- **Creative Science School ayaa dib loogu raray Bridger isagoo ah K-8.** Qaabaynta diwaangelinta la saadaaliyay ee 2025-26, waxa la qiyaasayaa in ku dhawaad kala badh dugsiga lagu qori doono bakhtiyaanasiib halka badhka kalena lagu qori doono ardayda ku nool aagga dugsiga. Qeybta bakhtiyaanasiibka waxa loogu talagalay inuu agagaarka ka diwaangeliyo arday ka badan kuwa meelaha fog, iyadoo lagu qaatay hababka diwaangelinta ee hadda jira ee Creative Science School. Tani macnaheedu maaha inay ka tarjumayso habka dhabta ah ee ardayda loogu diwaangelinayo barnaamijyadan haddii qaabayntan la hirgeliyo.
- **Isbaanishka DLI ee heerka K-5 waxaa laga bixin doonaa Lent (dugsiga oo dhan) iyo Atkinson (goob wadaageedka jiray)** Barnaamijka DLI Isbaanishka ee hadda jira waxaa ku biiray barnaamijka laba-dhinaclaha ah ee hadda ka baxa Bridger. Lent wuxuu u beddelmayaa qaabka waxbarashada Isbaanishka DLI ee dugsiga oo dhan oo leh aag amaansho. Ardayda dhigata barnaamijka xaafadda Lent waxaa lagu martiqaadi doonaa inay ku biiraan barnaamijka DLI ee Isbaanishka ama waxay isticmaali karaan ikhtiyaarka ah inay ku biiraan dugsiga xaafadooda u dhow. Barnaamijka DLI ee Isbaanishka ee Atkinson ayaa weli ahaan sida uu yahay.
- **Shiinayska DLI ee heerka K-5 wuxuu ku nagaanayaa Clark (oo hore u ahaan jiray Harrison Park) iyo Woodstock, ee goobtooda qaab wadaaga ee horay u jirtay.** Barnaamijka Clark waa hal-dhinac, barnaamijka Woodstock-na waa laba-dhinac.

Xulashada Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta E1

Qoddobada ugu muhiimsan:

- **K-5 Shiineyska DLI ee Clark iyo Woodstock waxay ardayda u gudbinayaan Harrison Park.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaata u gudbinta Woodstock ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka Shiineyska DLI, maadaama barnaamijka xaafadda Woodstock uu u gudbiyo Hosford ama Ikhtiyaarka E1.
- **K-5 Isbaanishka DLI ee Lent (dugsiga oo dhan) iyo Atkinson (kula yaal)** u gudbinta Kellogg.

Kellogg ayaa isdiiwaangelintiisu buux dhaafi doontaa haddii aan hal ma dhowr barnaamij oo xaafadeed meel kale loo rarin.

- **Xaafada Atkinson K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park.** Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaata u gudbinta Atkinson ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka isbaanishka DLI, maadaama barnaamijka isbaanishka DLI uu u gudbin doono Kellogg. Waxa kale oo ay keenaysaa kala qaybsanaanta u gudbinta heerka dugsiga sare Harrison Park waxa la filayaa in uu u gudbiyo McDaniels High School iyo Atkinson waxa uu ku ag yaalaa Franklin High School.
- **Xaafada Creston K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Hosford.** Tani waa si looga foggaado buuxdhaafinta Kellogg iyo yaraanshaha isdiiwaangelinta ee Hosford.
- **Xaafada Lewis K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane (sida ku cad Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C).** Tani waxay keenaysaa in isdiiwaangelinta Sellwood Middle School ay hoos uga dhacdo 500.

Kheyraadka Xulashada E1:

[Guudmarka tirakoobka E1](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha E1](#)

[E1 tallaabooyinka saameynta sinnaanta jinsiyadeed](#)

Xulashada Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta E2

Qoddobada ugu muhiimsan:

- **K-5 Shiinayska DLI ee Clark iyo Woodstock waxay ardayda u gudbinayaan Kellogg.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Clark iyo Woodstock ee u dhaxaysa barnaamijyadooda xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Shiinayska,
- **K-5 Isbaanishka DLI ee Lent (dugsiga oo dhan) iyo Atkinson (kula yaal) waxay u gudbinayaan Harrison Park.** Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Atkinson ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Isbaanishka,
- **Xaafada Lewis K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane (sida ku cad Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C).** Tani waxay keenaysaa in isdiiwaangelinta Sellwood Middle School ay hoos uga dhacdo 500.

Kheyraadka Xulashada E2:

[Guudmarka tirakoobka E2](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha E2](#)

[E2 tallaabooyinka saameynta sinnaanta jinsiyadeed](#)